






# Skellefteå 2030

Xeeladda dib u habayn
bulsho oo waarta







SKELLEFTEÅ

Skellefteå xeeladeeda horumarin ee maxaliga ah.
La qaatay 2015, la cusboonaysiiyay 2022.

# Nuxurka


**Hordhac** **3**

**Awoodahayaga** **4**

**Sidan ayaan u dhisnay xeeladdan** **5**

Aragtida:
**Goob waarta looguna talogalay maalin fiican** **7**

Qaabka wajahaadda:
**Awoodaha ay tahay inaan sii dhisno** **8**

**Dhinacyada xeeladda** **9**

Goob lagu faraxsanaado 9

Goob lagu faraxsanaado: Jihooyinkayaga 10

**Aqoon iyo abuurid dhanka nolosha oo dhan** **14**

Aqoon iyo abuurid dhanka nolosha oo dhan: Jihooyinkayaga 15

**Goob kobcid dhinaca waaridda iyo caalami ah** **18**

Goob kobcid dhinaca waaridda oo caalami ah: Jihooyinkayaga 19

**U dhowaansho nolosha maalinlaha iyo caalamka** **22**

U dhowaansho nolosha maalinlaha iyo caalamka: Jihooyinkayaga 23

**Fulinta iyo la socodka** **26**

# Hordhac

Horumarka ka dhacaya gobolkeena imminka wuxuu ahaa fikrad fog markii aragtidii ugu horeysay ee xeeladdan la soo saaray 2015-kii. Dabcan way jireen hadafyo hiyi ka buuxo, laakiin kobcid xawaare dhexdhexaad ah ayaa dadka badankoodu arkayeen. Sidaasi may noqon. Horumar caadi ahaan socda muddo ah 40 sano ayaa halkan ku dhacay tobban sano. Ugu badnaan.

Sanadaha soo socdaa waxay la imanayaan fursado iyo hawlo labadaba. Marka bulshadu dhakhso isu baddasho ayaa dhibta runta ee koritaanku iman karaa. Side ayaa goobtan si waara ugu horumaraysaa, isla markaana aynu dhowrayno is aaminad, xasilooni iyo wixii kale ee loo qiimeeyo si aad ah? Sidee ayaan u wajahaynaa baahiyaha cusub si dhakhso ah, iyadoo aan laga leexanayn in xooga la saaro baahida dadka ee maalinlaha ah? Waxaa jira dhinacyo badan oo ay tahay in laga shaqeeyo – oo mararka qaarkood iska hor-imaadyo hadafyada ah ayaa khasab ka dhiga door bidida ahmiyado adag.

## Waasac u ah dadka oo dhan

Si buuxda waxaa hubaal u ah waasacnaan dadka oo dhan la siiyo si aad u baahsan dhammaan gudaha degmada Skellefteå. Iyadoo aan loo eegayn da'da, jinsiga, jinsiga qofku dareemayo inuu yahay ama cabbir, ka tirsanaansho qolo, diin ama aaminaad kale, hoos u dhac awood laxaad, jinsiga qof jecelyahay inuu u galmoodo ama shakhsiyadda dhaqan ahaan. Wadajir oo keliya ayaa dhammaan awoodda dhanka isbaddalkan looga faa'iidaysan karaa. Hawsha lagu samaynayaa waa inay lahaato xawaare iyo ku jiheysnaan hadaf.

In dib loo cusboonaysiiyo xeeladda horumar ee wadajirka ah waa tallaabo loo qaadayo jidkaas.

## Fursado fiican

Meesheenan waxa astaan u ah is aaminaad sareysa iyo isku dulqaad, aqoon xirfadeed dhinaca ganacsiyada waara iyo kharyaad dib loo cusboonaysiiyo oo goob ku tiirsan. Waxay taas inaga kaxaysay goob banaanka ka ah ilaa xarun aynu u noqonay dib u habayn bulsho oo cagaaran oo waarta. Waxaa intaas dheer in aan waayo-aragnimo u leenahay awoodda dhaqaaqa horay u socod oo laga abuuray ka qaybqaadasho balaaran taas oo qaar badan ay raad ku yeeshaan horumarkan. Waxaan fursado u haysanaa inaan noqono hor-galayaal.

Xeeladdan waxay ku dhisan tahay garasho, fikrado iyo wada hadalo la sameeyay intii lagu jiray 2021 iyo 2022 oo lala yeeshay dad aqoon u leh iyo dadweynaha. Waxaa xitaa ka dambeysa is-waafaqsanaan siyaasadeed oo balaaran.

Imminka waa wakhtigi la fulin lahaa. Haddii aad ka mid tahay hawshan waxaanu fursado sii fiicnaada u haysanaa in la gaaro hadafyadeena.

# Awoodahayaga

Isbadalka Skellefteå wuxuu qayb ka yahay dhaq-dhaqaaq weyn kaas oo ka dhacaya degmadeena isla markaana ay ka dambeyso isbadalada waaweyn ee caalamka. Kuwaas waxaa ku jira waxyaabo ay ka mid yihiin natiijada isbadalada cimilada, dhijitaal u guurid, korontayn iyo bulsho ku xiriirsan.

Xagga sare ee Norrland waa gobolka dhanka Midowga Yurub lagu qiimeeyay inuu ugu sareeyo 270 marka ay noqoto horumarka bulsho[1]. Xasilooni, is aaminaad, helid waxbarasho sare isla markaana daryeel bukaan waa waxyaabo muhiim ah. Halkan waxaa xitaa laga helayaa aqoono hormood ka ah aduunka iyo qaab wajahaad oo abuurid cusub leh, helitaan weyn dhanka tamar dib loo cusboonaysiiyo iyo khayraad kale oo goobta ah kuwaas oo qiimo u leh dib u habaynta bulsho. Tani waxay ina siinaysaa meel fiican in wax laga bilaabo.


Taas ayaan u baahanahay. Sababtoo ah isla mar ahaantaas waxaa jira hawlo waaweyn oo aan rabno in kobcidda dhakhsaha ah inaga caawiyo in aan xalino. Tani waa waxyaabo ay ka mid yihiin aqoonta bulsho ee juqraafi ahaan, lehna dadweyne sii gaboobaya iyo in haween badan ka guurayaan. Taariikhiyan dadka u soo guuraya degmadan aad ayay u hooseysay.

Tani waxay sababtay in helitaanka aqoon iyo waxa lagu magacaabo tiradu ay yihiin laba hawlood oo muhiim ah. Waxaa loo baahanyahay dad dheeraad ah oo shaqeeya oo iyaguna waxay u baahanyihiin inay helaan aqoon sax ah. Sidoo kale dadka oo dhan ayaa u baahan in la siiyo fursado fiican si ay u horumaraan iyadoo ku salaysan awoodahooda. Si loo hubiyo in inageena joogna Skellefteå aynu ugu noolaan karno nolol fiican nolosheena oo dhan. Safarada iyo gaadiidyada degmo balaaran xitaa taas waa hawl weyn, sidoo kale fursadaha in la abuuro guryo ay tahay in laga hortago kala qaybsanaan bulsho.

**Si dheeraad ah u akhriso awoodahayaga taas oo ku jirta Lifaaqa 1.**

1 EU Social Progress Index:
https://ec.europa.eu/regional_policy/en/information/maps/social_progress2020/

# Sidan ayaan u dhisnay xeeladdan




Xeeladdan waxay ka koobantahay saddex qaybood:

**Aragti**. Xeeladdan waxay ku salaysantahay aragtida ah **Goob waarta looguna talogalay maalin fiican**, taas oo ay diyaarisay degmada Skellefteå. Tani ayaa wadajir la ah hadafka siyaasadeed ee in la kordho ilaa 90 000 qof oo ku nool ugu dambeyn sanadka 2030, waa xudunta xeeladdan iyo jihooyinkeeda.

**Qaabka wajahaadda.** Fikirkayaga wadajirka ah ee sida aan u gaari doono hadafyadeena ayaa fure u ah horumar. Kuwa ay yihiin awoodaha ay tahay inaan sii dhisno waxay ku sharraxanyihiin qaabkayaga wajahaadda. Taas waxaan ku soo koobnay erayada ah **si wadajir u abuurid, wada shaqayn iyo awood in wax la badalo**.

**Dhinacyada xeeladda.** Waxaan ku jiheysanahay afar aag oo balaaran. Kuwaas ayaa sharraxaya ahmiyadaha iyo jihooyinka hawsha horumarinta. Kuwa aan dooranay waa sidan soo socota:

- **Goob lagu faraxsanaado**
- **Aqoon iyo abuurid dhanka nolosha oo dhan**
- **Goob kobcid dhinaca waaridda iyo caalami ah**
- **U dhowaansho nolosha maalinlaha iyo aduunka**

Xeeladda horumarka waxay khuseysaa Skellefteå oo dhan oo ku jiheysantahay dhammaan dadka rab inay ka mid ahaadaan isbaddalka bulsho.

**GOOBTA SKELLEFTEÅ**

Halkan waxaa ku jirta dhammaan juqraafi ahaan inta galaysa degmadan xuduudaheeda: Magaalo yar, bulsho, tuulooyin koraaya iyo wax walba laga bilaabo dhul duur ah oo balaaran ilaa iyo xeebta weyn. Sidoo kale dhaqanka iyo taariikhda ay degmadan wadato iyadoo qayb ka ah Sápmi.

**INNAGA**

Dhammaan dadka ku nool ee ka hawl gala gudaha degmadan. Halkan waxaa ku jira dhammaan dadka leh aqoonsiyada kala duwan ee ay doortaan inay qaataan oo ka mid ahaadaan. Dhalinyarada, waayeelka iyo dhammaan inta u dhaxaysa. Dhammaan aqoonsiyada jinsi. Si la mid ahna dabcan dadyowgeena laga tirada badanyahay ee Yuhuudda, Roomka, Saamar, Finlaandiiska Iswiidhan iyo reer Tornedal isla markaana kuwa halkan yimi ee ka soo guuray dalal kale. Liistadan waa la dheerayn karaa – waxay si sahlan ugu saabsantahay qof kasta, iyadoo aan loo eegayn haddii qofkaas halkan ku noolaa jiilal ama haddii mar dhow loo soo guuray.



Aragtida:
# Goob waarta looguna talogalay maalin fiican

**Goob waarta looguna talogalay maalin fiican.** Sidaas ayay tahay aragtideena dhanka mustaqbalka Skellefteå oo ah meel laga hawl galo oo lagu noolaado.

Tani waxay ina siinaysaa sawir mustaqbal oo jiheynta u dhigaysaa hawsheena. Si loo xoojiyo horumarka ku aadan aragtidan waxaanu leenahay hadaf ah in la kordho oo la noqdo **90 000 qof oo ku nool sanadka 2030**. Kobcid dhakhso ah wuxuu keenayaa in aynu ka faa'iidaysan karno fursadaha weyn ee sanadihii ugu dambeeyay warshadayntu wadatay, iyo iyadoo la kaashanayo kuwaas la abuuro horumar waara oo wakhti dheer ah dhanka meeshan. Xeeladdeena horumar waa inay kaalmayso in aynu ka soo bixi karno hadafkan oo wakhtiga fog u dhowaano aragtidan.

## Aragtidan waxaa lagu tilmaami karaa sidan:

### Goob waarta

Skellefteå waa goob waarta taas oo qaadasa mas'uuliyadda jiilalka soo socda. Halkan waxaa ka jirta awood dadaal iyo rabitaan ah in si joogto ah loo horumaro oo waxaan tani u samaynaynaa iyadoo la ixtiraamayo deegaankeena, dadkeena iyo khayraadkeena. Skellefteå waxay ku koraysaa aqoonyo cusub, shirkado iyo warshado hubinaya shaqooyinka mustaqbalka iyo daryeelka guud ee bulsho. Bulshadeenu waa mid dadka oo dhan ka mid yihiin oo waxay ka faa'iidaysanaysaa shakhsiyaadka oo dhan kala duwanaanshahooda. Si wadajir ah ayaan u abuuraynaa goob soo jiidasho leh.

### Nolol maalinle oo fiican

Skellefteå waxay dadka ku casuumaysaa nolol maalinle u fiican dadka oo dhan. Dhowaanshaha iyo sahalanaanta ayaa ka dhiga isku hagaajinta nolosha inay isku beeganto. Halkan ayay wadajir ugu kulmaan miyi iyo magaalo oo dadka ku casuumaan xasilooni, deegaan dabiici ah, waxyaabo badan oo la helo iyo goob. Daryeel dadweyne oo fiican iyo koritaanka suuqa shaqo ayaa abuura xasilooni, aaminaadda mustaqbal iyo fursado horumar oo xiiso leh. Skellefteå waxaa lagu soo dhaweeyaa dadka oo dhan wadajirnimadeena ay is aaminaad, geesinimo iyo furnaansho wada socdaan.

## Muuqaalka guud ee horumar waara

Xeeladdan ayaa inagu hagaysa hawsha dhinaca in la abuuro horumar waara kuna salaysan fikradda bulsho, deegaanka wax i fiican iyo dhaqaale ahaanba. Ma jirto aragti mid kale ka sareysa – taas oo keenta in isku miisaamidda aragtiyaha ay keeni karto iska hor imaadyada hadafyada.

Kuwaas waxaa la maareeyaa iyadoo aynu qiimeyneyno cawaaqibka oo samayno doorashooyin laga warhayo si loo gaaro natiijooyin fiican wakhtiga fog sidii ah suurtagal.

Hadafyadeena iyo go'aamadu waa inay kaalmeeyaan in aynu si wadajir ah ugu sii dhowaano aragtida in la ahaado oob waarta looguna talogalay maalin fiican.

## Qaabka wajahaadda:
# **Awoodaha ay tahay inaan sii dhisno**

Taageero balaaran oo ka dambeysa iyo sawir wadajir oo ah in isbaddal loo baahanyahay ayaa arrin guul ah u ahayd markii Skellefteå la horumarinayay.

Marka taageeradan ay ku baahsantahay siyaasadda, ganacsiga, qaybta dawladda, nolosha ururada iyo dhammaan dadka kale ee ku nool kana hawl gala degmada ayaan xitaa xoog ku noqonaynaa isbaddalkan. Tani waxay si weyn ugu saabsantahay fahamka ah in isbaddal yahay suurtagal iyo lagama maarmaan – iyo wada hadalka dhinaca sidii aynu rabno inay u eekaato. Laakiin ma ku saabsana in xaalad walba lagu yahay heshiis – badnaanshaha kala duwan ee fikradaha ah sidii aynu wadajir uga faa'iidaysan lahayn furadahaas una wajihi lahayn hawlahaas ina horyaala ayaa ah faa'iido. Sida aynu aragno waxaa muhiim ah in ficilka ay astaan u tahay awoodda isbaddalka, wada shaqayn iyo wax wada abuurid – tayooyin ku salaysan is aaminaad.

## Wax wada abuurid

Marka horumarka bulsho tahay mas'uuliyad wadajir ah waxay kaalmaysaa bulsho maxali ah oo xoogan lehna is aaminaad iyo xasilooni. Iyadoo oo aanay ku xirnayn haddii ka qaybqaadashadu tahay mid ah door xirfadeed ama dhinacyo gaar ah sida waalid ahaan, deris ama qof kale oo bani'aadam ah. Dadka oo dhan waa in la siiyo fursad isku mid ah oo lagaga qaybqaato horumar bulsho oo ay astaan u tahay kala duwanaansho iyo dhaqamo badan.

## Awoodda isbaddal

Awoodda in laga warhayo aduunka, dib u habayn iyo in si cusub loo fikiro ayaaf faa'iido muhiim ah ahayd markii Skellefteå u horumaraysay si guul leh. Tani ayaan rabnaa inaan sii dhisno. Dhaqaale caalami ah oo kala duwan, natiijooyinka la arko ee isbaddalada cimilada iyo isbaddal dhakhso ah laga soo bilaabo mid taagan ilaa kobcid sareysa oo leh dhibta koritaan oo natiijo ah ayaa keentay in awoodda isbaddal loo baahanyahay si ka badan sidii hore.

## Wada shaqayn

Xiisaha kordhay ee ka yimi aduunka iyo u soo guurida kordhaysa waxay abuuraysaa fursado dhinaca wada shaqayn cusub. Rabitaan wada shaqayn oo fiican wuxuu keeni karaa aqoon cusub iyo fursado ah in la gaaro meelo badan oo cusub oo caalamka ah. Sidoo kale waxaa muhiim ah dhammaan xiriiryada jira – gobolka, dalka iyo caalamka intaba. Mana ugu yara markay noqoto in la helo aqoonyo sax ah kuwaas oo sii wadi kara in la horumariyo shirkadaha iyo hawlaha shaqo ee kale.

# Dhinacyada xeeladda



Goob lagu faraxsanaado

### Deganaansho iyo ku noolaansho

## Goob lagu faraxsanaado

### Horumarka la doonayo

Meelaha la deganyahay iyo adeeg bulsho loo qaabeeyo baahida weyn iyo shuruudaha kordhay ee horumar waara. Is aaminaad iyo qaab wajahaad oo laga wad mid yahay waxay kaalmeynayaan ka qaybgal balaaran taas oo keenaysa in meeshan ku sii socoto inay horumarto oo noqoto mid leh soo jiidasho. Skellefteå way sahlantahay in lala qabsado oo wax cusub laga helo tuulooyinka, bulshada iyo magaalo sii camirmaysa – taas oo aan ku xirnayn haddii aad halkan ugu nooshahay si joogto ah ama haddii aad soo booqatay.

### Aasaaska

Skellefteå waxay u baahantahay inay soo jiidato dad badan, kana kala yimi dalka oo dhan iyo caalamka oo dhan. Waxaan u baahanahay inaan noqono dhalinyaro badan iyo dad badan oo dhexda kaga jira nolosha shaqo. Markaas ayaa hawlaha weyn ee dhinaca helitaanka aqoon xitaa la maareyn karaa. Marka goobtu isbaddasho ayay imanayaan aqoonyada kala duwan, waayo-aragnimooyinka nololeed iyo kulamo badan una dhaxeeya dadka in ay abuuraan goob leh firfircooni dheeraad ah. Isla markaas waa inaan qiimeyno oo ka faa'iideysano dhaxalkeena dhaqan si loo abuuro fursadaha fiican ee suurtagal ah in la sii wado horumarka goobtan awoodeeda nololeed.

Dareenka leh amaan iyo in dadka oo dhan ay qayb ka yihiin horumarka fiican ayaa la hawlgelin karaa. Sidoo kale helitaanka guryo dhinaca xaalad kasta oo nolosha ah iyo adeegyo bulsho oo aasaasi ah. Bulshada adeegeeda iyo waxyaabaha laga helayo waxay u baahanyihiin inay la socdaan oo ku haboonaadaan baahiyaha cusub ee kordhaya.

Maalgashiyo weyn iyo xawaare dhisme oo dhakhso ah ayaa keenaya fursado in la horeeyo oo wakhti kooban lala jaan qaado bulsho waarta dhinaca cilmiga noolaha iyo deegaanka. Helitaanka guryo waa in la haqab-tiro oo guryo kala duwan la suurtageliyaa. Goob koraysaa waxaa dheeraad u ah inay abuurto fursado ah dhinaca soo bandhigid dhaqan oo balaaran, madadaalo iyo hawlo wakhti firaaqo iyo nolol ganacsi oo koraysa.

**Wareegidda tan iyo 2015.** Guryo, amaan, ka mid ahaansho iyo helitaanka ayaa imminka helay boos weyn. Amaanka maanta ka jira Skellefteå waa in la ilaaliyo. Hamiga in la horumariyo waa inuu ka dhaco degmada oo dhan – magaalo iyo miyiba – waan haysanaynaa.

# Jihooyinkayaga

## Horumar bulsho oo loo marayo in xooga la saaro ka mid ahaanshaha dadka

Ka qaybqaadasho balaaran dhinaca horumarka bulsho iyo is aaminaad sareysa waxay kaalmaynaysaa in dadku yeeshaan awood, ku dhiirasho oo kaalintooda qaadaan. Bulshadu waa mid dadku ka mid yihiin, sinaan iyo dulqaad iyo ku dhiirasho maalgashiga dhinaca horumarinta iyo dadaalo ka hortagg oo keenaya natiijo wakhtiga fog. Halkan ayaa dad amaan ah oo da' walba ah ku abuuraan noloshooda oo ku salaysan awoodahooda iyo baahiyahooga.

## Tani waa in la gaaro iyadoo loo sii marayo:

- **Wada hadalyo kordhinaya is fahamka**
  Is aaminaado way kordhaysaa marka dadku dareemaan in la dhagaysanayo oo ay leeyihiin ka qaybqaadasho. Waa inaan abuurno fursadaha wada hadal oo halkaas isku dhagaysanaa, helnaa isu tanaasulyo oo abuurnaa is afgarad.

- **Bulsho xoojinaysa carruurta xaaladooda**
  Carruurta xaaladooda bulshada waa in lagu xoojiyo iyadoo si wadajir ah loo tixgelinayo baahiyahooga iyo fursadahooda, sidoo kale xitaa iyadoo loo marayo in iyaga laf ahaantooda ku yeeshaan ka qaybqaadasho dheeraad ah oo la maqlo codadkooda.

- **Hawl sinnaan oo jebinaysa xaaladda guud**
  Dadka oo dhan iyadoo aan loo eegayn jinsi iyo cabbirka jinsiga ay isu arkaan waa inay lahaadaan xuquuq, fursado iyo waajiubaad isku mid ah. Waa inaan suurtagelino bulsho jebinaysa doorarka guracan iyo xaaladda guud.



### Wajahidda hawsha koritaanka tirada dadweynaha

Korodh dhakhso ah dhinaca tirada dadka ku nool waxay abuuri kartaa dhibaato koritaan gudaha bulsho. Isku xirkan waa inuu dhaco iyadoo helitaanka goobo lagu kulmo sida dhul cagaaran iyo nolosha u dhaxaysa guryaha iyo adeegyada muhiimka u ah bulsho sida maktbado, maqaaxiyo iyo goobaha kale aanu noqon mid aan la heli karin. Dareen amaan waa in la dhiso iyadoo loo marayo in la horumariyo iyo hawsha ka hortagga taas oo dhammaan qaybaha bulshada ka qaybqaadanayaan – bulshada rayidka ah, qaybta guud iyo ganacsiga intaba. Sidaas ayaan u dhisi karnaa wadajirnimo iyo ka mid ahaansho ka hortaggaya amaan daro iyo in banaanka laga joogo.

## Tani waa in la gaaro iyadoo loo sii marayo:

- **Daryeel, xanaano iyo taageero leh sinaan**
  Dadku waa inay helaan daryeel, xanaano iyo taageero fiican meel kasto oo ay kaga noolyihiin gudaha degmadan iyadoo aanay ku xirnay cidda ay yihiin. Shakhsiga baahidiisu waa inay ahaato muhiimadda oo waa inay jirto darajo sare oo qofku keligiis wax go'aansado iyo ka qaybqaadasho.

- **Nolol firfircoon inta u dhaxaysa guryaha**
  Goobaha dadweynaha ka dhaxeeya waxaa loogu talogalay dadka oo dhan. Goobaha kulanka iyo deegaanada lagu noolyahay waa inay ahaadaan amaan oo laga helo meel nolosha inta u dhaxaysa guryaha ay tahay mid camiran oo boos la siiyo wixii ganacsi ah iyo dhaqan kala duwan, farshaxan iyo cagaarnaan.

- **Bulsho xor ka ah dembiyada**
  Hawsha ka hortaggidda dembiyada waxaa loo sii marayaa dadaalo badan dhinaca dhowr aag oo kala duwan. Waxaa la waafajinayaa xaaladaha maxaliga ah iyo fursadaha ah in la helo natiijada ugu fiican ee suurtagal ah.

- **Dhaqan iyo nolol ururyo kobcaysa**
  Bulshada rayidka waa inay u horumarto iyadoo la jaan-qaadaysa in bulshadu isbaddashay iyo in Skellefteå korayso. Hawlaha qorsheysan iyo kuwa lagu hogaamiyo shaqo waa qayb bulsho oo muhiim ah oo barbar socota ta kediska ah.

### Deegaano nololeed oo qani ku ah soo aragga

Farshaxan dhismo, qaab iyo naqshad ayaa kaalmaysa waaritaanka iyo Skellefteå siman lehna deegaano nololeed oo dadku ku faraxsanyahay. Iyadoo leh dhismayaal isku dhex jira, cagaaran, biyo iyo wadooyin ku yaal degmada oo dhan ayaa dadka lagu casuumayaa aragtiyo balaaran oo weyn looguna talogalay dadka ah da' walba. Deegaanka dabiiciga ee ku hareersan wuxuu bixinayaa nolol hawo fiican dhinaca duurka, badda iyo dooxyada xilliyada sanadka oo dhan.  Soo bandhigidda munaasabadaha waxay u kordhaysaa si tartiib ah iyadoo si wadajir ah ula socota nolol ganacsi taas oo lagu socodsiiyo dad badan dadaalkooda iyo xiisahooda. Waxa kale oo hubaal ah in loo qorsheeyo si waarta – dhisidda oo isticmaalku dhaco iyadoo la tixgelinayo deegaanka dabiiciga ah iyo deegaanada dhaqan ee jiilka maanta iyo kuwa soo socda.


## Tani waa in la gaaro iyadoo loo sii marayo:

- **Qaabayn isku duuban taas oo dhiiri-gelinaysa**
  Skellefteå dhinacyadeed shaqooyinka guud waa inay tusaalooyin u noqdaan dhinaca qaabaynta. Farshaxan dhismo, qiimaha dhaqan, qaabayn caalami ah iyo nashqadayntu waa inay si wadajir ah u horumariyaan deegaano amaan ah, la helayo oo laga mid yahay kuwaas oo isku xiraya meelaha la deganyahay, jidadka, cagaarka iyo biyaha.

- **Aragtiyo iyo dhaqan dhiiranaya**
  Helitaan dhaqan iyo munaasabado waa inay abuuraan wadajirnimo, jeclaansho wax ogaansho iyo keenaan dhadhan badan. Halkan waxaa dadka lagu casuumayaa garoomo, masraxyo iyo deegaan hawada banaanka ah kuwaas lagu horumarinayo laguna qaabaynayo ka qaybgalayaasha dadaalkooda. Goobtan waa inay ahaato mid u furan fikrado cusub kuna saabsan halka iyo sida wakhtiga aynu ku jirno loo tilmaamayo.

- **Nolol hawo banaanka ah oo kala duwan oo aad u dhow**
  Qof walba xaafadda u dhow waa in lagu siiyo fursado fiican dhinaca nolol hawo banaanka ah dhinaca deegaanada dabiiciga ee kala duwan iyo jardiinooyinka labadaba. Skellefteå-da kala duwanaansho badan leh waxaa xoojinaya deegaan dhiirigelinaya hawlo iyo farxad dhaqdhaqaaq.

- **Raad ku yeelasho deegaan oo yaraata iyo deegaano dabiici ah oo wakhti dheer jiraya**
  Kala duwanaanshaha bayalooji iyo deegaanka dabiiciga ah waa in la ilaaliyo, horumariyo oo looga faa'iideysto si waaraysa. Hawlaha daryeelka khayraadka dabiiciga ah waa inay fiicnaadaan. Xalyo cusub ayaa la tijaabinayaa si loo gaaro yaraynta culeyska deegaanka.



### Guryo loogu talogalay xaalad kasta oo nolosha ah


Waa inay jiraan guryo qani ku ah kala duwanaanshaha looguna talogalay qayb kasta oo nolosha ah – iyadoo aan loo eegayn da'da iyo xaalad nolol. Degmo balaaran waa in fursadaha goob kasta laga faa'iideysto oo tirada guryaha ay u dhigantaa baahida. Meelaha la deganyahay waxay ka hortagayaan kala qaybsanaanta bulsho iyagoo ahaanaya kuwo isku dhex jir ah oo dadka ku casuumaya qaabab loo helo oo balaaran. Inta lagu jiro isbaddalka bulsho waxaa la qaabayn doonaa meelo la deganyahay oo cusub. Xitaa meelaha la deganayahy ee imminka jira iyo qiimahooda waa in laga faa'iideysto oo la horumariyo.

## Tani waa in la gaaro iyadoo loo sii marayo:

- **Qorsheyn guryo oo ka hortagaya kala qaybsanaan bulsho**
  Waa inaan qorsheyno oo suurtagelino xaafadaha leh meelo la deganyahay oo isku dhex jira kuwaas oo ka kooban dhammaan noocyada qaababka la helayo oo aynu u kala dhaqaaqi karno cusub iyo xaafadaha horey u jiray. Waa inay horumariyaan kulanka u dhaxeeya dadka Skellefteå dhowaan soo degay iyo kuwa horey u saldhigtay.

- **Dhisid ah degmada oo dhan**
  Waxaan wax ka dhisaynaa deegaano balaaran, laga bilaabo magaalo ilaa miyi looguna talogalay habab nololeed oo kala duwan oo badan. Waxaanu nahay kuwo u dabacsan noocyada hoy ee kala duwan, silsilad guuris oo dhakhso ah iyo nolol shaqo oo isbaddashay.

- **Xawaare dhismo oo kordhay lehna tayo sax ah iyo kala duwanaansho**
  Xawaaraha dhisid wuu kordhayaa oo wuxuu yeelanayaa tayo wajahaysa baahida guryo ee Skellefteå koraysa. Waa inay jiraan guryo dadka ku filan oo waa inay kuwaas wajahaan baahida qaababka hoy ee kala duwan iyo baahida bulsho ee xawaaraha dhisme oo kordha. Taasi waxay fududeynaysaa in la soo galo suuqa guryaha ee gudaha Skellefteå.



Waxbarasho iyo aqoon

# Aqoon iyo abuurid dhanka nolosha oo dhan



**Aqoon iyo abuurid dhanka nolosha oo dhan**

## Horumarka la doonayo

Fursado waxbarasho oo fiican nolosha oo dhan waxay kaalmeynayaan dhinaca dad ku nool oo aqoon leh, doonaya inay wax cusub ogaadaan oo abuur leh. Waxa kale oo ay arrin muhiim ah u tahay in la awoodo horumarinta bulsho aan cidnaba banaanka ka joogin. Nidaamka waxbarasho ee dugsiga xanaanada, dugsiga hoose-dhexe iyo dugsiga sare waa inuu isku qiime lahaado oo haqabtiro tixgelinta xaqa caruurta iyadoo aan loo eegayn goobta guriga ama xaaladaha shakhsiyeed. Xilliga dambe ee nolosha waa inay jirto u dhowaansho waxbarasho laga bilaabo heer dugsi sare ilaa heer jaamicad oo balaaran lehna takhasus labadaba. Si wadajir ah ayaa deegaanada kale iyo iyadoo la xiriirta dhinaca waxbarasho loo abuurayaa fursado dabacsan looguna talogalay waxbarasho nolosha oo dhan ah taas oo si fiican ugu aadan rajooyinka shaqo-bixiyayaasha gobolka.

## Aasaaska

Waxbarasho waxay ka socotaa marxaladaha kala duwan ee nolosha oo dhan. Bilow ahaan, gudaha dugsiga xanaanada, dugsiga hoose-dhexe iyo dugsiga sare waa inay u dhigmaan hawlaha weyn ee wakhtiga imminka yaala. Taasi waxay khuseysaa Skellefteå iyo Iswiidhan guud ahaan. Kobcidda laga filayo Skellefteå ayaa qiimuhu noqon doonaa hawl ina hortaal oo weyn, maadaama korodhka koritaanku keeni doono gabaabsi aqoon iyo gabaabsi dhismayaal. Meelaynta juqraafi ee dugsiga xanaanada iyo dugsiga hoose-dhexe waa muhiim, maadaama ay raad ku yeelato fursada carruurta iyo ardayda ka kala yimi deegaano ay ku soo koreen oo kala duwan inay kulmaan oo qaabkaas u kaalmeeyaan deegaano waxbarasho bulsho oo waara. Xitaa deegaanada waxbarasho dhismayaashoodu waa muhiim maadaama ay abuuraan fursadaha ah sida loo habayn karo waxbarasho tayo leh.

Xilliga dambe ee nolosha waxaa jirta waxbarashada dadka waaweyn, kuliyad iyo jaamicad iyo qaybo waxbarasho oo kale. Dhammaan hawlahan ayaa muhiim u ah helitaanka aqoon si fiican u shaqaynaysa. Heer waxbarasho oo dugsi sare waxay muhiimad la mid ah u leedahay aqoonta takhasus ee waxbarashada sare suurtagelin karto. Degmo koraysa waxaa tartan xooga shaqaale noqon doonaa mid adag oo markaas u dhowaanshaha waxbarshooyinka heerarka oo dhan ayaa muhiim u noqonaya in la wajaho gabaabsiga aqoon ee isla maantaba ah wax xaqiiq ah.

**Wareegidda tan iyo 2015.** Muhiimadda waxaa laga wareejinayaa dadaalka shakhsiga loona wareejinayaa ka mid ahaansho iyo qaabab si fiican u shaqaynaya. Qiimo isku mid ah, helitaanka aqoon iyo waxbarasho nolosha oo dhan ah ayaa kor loo qaadayaa oo wada shaqaynta qaybaha waxbarasho iyo shaqo-bixiyayaasha ayaa ahmiyad la siinayaa.

## Jihooyinkayaga

### Waxbarasho isku qiimo ah oo loogu talogalay ilmo walba

Qiime isku mid ah waa ta ugu muhiimsan dhinaca waxbarashooyinka marka laga eego dhinaca xaqa carruurta. Waxay xitaa awood wax dhaqaajisa oo xoogan u tahay waarista bulsho iyo dhaqaale ee bulshada oo dhan. Waxbarashadu waa inay gaarto dadka oo dhan, iyadoo aan loo eegayn dhaqan ama halka laga soo jeedo. Skellefteå-da koraysa waxaa hawshan lagu maaraynayaa farsamo cusub iyo aqoon cusub. Tani waxay abuuraysaa fursado qof walba ku kaalmeyn karo jeclaanshahiisa ogaanshaha wax cusub iyo abuur samayn.

### Tani waa in la gaaro iyadoo loo sii marayo:

- **Hawlo haboon oo wakhti hore ah dhinaca carruurta iyo ardayda**
  Taageero wakhti hore ah waxay muhiim u tahay in shakhsi kasta gaaro awoodiisa buuxda oo noqdo qof sidiisa ugu fiican ah. Tani waxay khuseysaa guriga, wakhti firaaqaha iyo iskoolka intaba. Dhinaca iskoolka ayaa baddalka dugsi xanaano ilaa dugsi hoose-dhexe, ta u dhaxaysa heerarka dugsiga hoose-dhexe ama baddalka dugsiga hoose-dhexe ilaa dugsiga sare aad u tahay muhiim.

- **Helitaanka deegaano waxbarasho oo shakhsi walba siinaya taageero**
  Deegaanada waxbarasho waa deegaano meel ah ama sawir ahaan oo waxbarasho ka dhacayso. Deegaan waxbarasho wuxuu ku baahsanyahay alaab waxbarasho, alaab kale, alaabta taala, taageero iyo in qofku helo. Iyadoo loo marayo in laga faa'iideysto wixi casri ah iyo wixii horey loo tijaabiyay ayaa deegaanka waxbarasho ku noqonayaa mid lahelo. Iyadoo loo marayo qaabayn caalami ah oo ay ka mid yihiin deegaanada waxbarasho iyo xalyo ayaa ay isticmaali karaan dadka oo dhan iyadoo aan loo baahnayn in la haboonaysiiyo ama qaabayn gaar ah.

- **Qaab shaqo oo horumarinaysa waxbarasho leh tayo sare**
  Dhinaca qaabab shaqaalaha dhexdooda ah iyo nidaamyo shaqo ayaa lagu abuurayaa fursadaha dhinaca in la horumariyo waaqiciga maalinlaha ah. Tani waxay u dhacdaa sida dhinaca xiriir ka jira gudaha degmada iyo heer qaran iyo caalami. Tani waxay bixisaa fursad dhinaca aragti xoojinaysa waxbarashada isla markaasna siinaysa carruurta, ardayda iyo dadka waaweyn waayo-aragnimooyin iyo fikrado horumarinaya meeshan Skellefteå.

- **Dugsiyo xanaano iyo iskoolo ayaa la qorsheynayaa si looga hortaggo kala qaybsanaan bulsho**
  Kala qaybsanaanta bulsho ee dhinaca guryaha waa sababta ugu weyn ee kala qaybsanaanta dhinaca bulshada. Qorsheynta juqraafi ahaan ee dugsiyada xanaanada iyo iskoolada waxay muhiim u tahay in carruurta leh awoodaha kala duwan ay kulmaan maalintii.



## Aqoonta dhinaca dib u habaynta iyo u fikirka si cusub

Silsiladda waxbarasho waa inay ahaato mid shaqaynaysa laga bilaabo dugsiga xanaano ilaa jaamicad laakiin xitaa dhinaca nidaamka wakhti firaaqaha iyo nolosha shaqo. Wada shaqayn fiican oo lala yeesho jaamicad ayay ku fududaanaysaa in wax laga barto Skellefteå iyo meelo kale oo ku yaala hareeraha aduunka. Sahlanaanta in dib la isu habeeyo marka shaqo-bixiyayaasha baahidooda ama awoodaha wax dhaqaajin ee gaarka ah ay isbaddalaan waa inay Skellefteå hormood noqotaa marka ay tahay in la horumariyo aqoonaha dhisaya nolosha ganacsiga ee berrito iyo ta guud ee dadweynaha.

### Taas waxaan ku gaaraynaa iyadoo loo sii marayo:

- **Wada shaqayn lala yeesho jaamicadaha iyo kuliyadaha**
  Wada shaqayn xeeladaysan oo lala yeesho jaamacadaha gobolkan iyo in goobaha kale loo baahdo in la sii horumariyo. Waxbarasho iyo cilmi-baaris waxay xudun u yihiin helitaanka aqoon iyo isbaddalka bulsho ee ina horyaala labadaba. Balaarnaanta waxbarashooyin jaamicad iyo kuliyado waxay xitaa muhiim u tahay dhinaca sinaanta.

- **Wajahidda hawlaha qaababka jira ee shakhsiga jidadkiisa dhinaca nolosha**
  Doorashada jid ee nolosha waxay badanaaba ku salaysantahay waayo-aragnimooyinka waalidka, dadka kuugu dhow ama hanaanyada jira. Tani waa in lagu wajaho iyadoo loo marayo in doorashooyin dariiqyo kale laga dhigo kuwa muuqda oo suurtagal ah.

- **Fursado waxbarasho oo balaaran oo takhasus leh ka dib dugsiga sare**
  Balaarka fursadaha waxbarasho ee heerka dugsi sare waxay u baahanyihiin in lagu dhammaystiro qaabab waxbarasho oo takhasus leh oo dabacsan ka dib heerka dugsiga sare. Tani waxay u dhacaysaa iyadoo loo maro wada shaqayn u dhaxaysa qaybaha waxbarasho iyo qaybta gaarka loo leeyahay, ta guud ee dadweynaha iyo qaybaha samafalka ah si loo kaalmeeyo in shakhsigu horumaro – oo wakhti ka dib ay u fududaato shaqo-bixiye inuu shaqada qorto aqoon sax ah.

- **Waxbarashooyin ka hortaggaya gabaabsi aqooneed**
  Horumarka aqoon ee dhinaca xirfadaha gabaabsi ka jiro waa la suurtagelinayaa oo la abuurayaa iyadoo wada shaqayn dhow lala yeelanayo laanta ganacsiga iyo qaybta guud labadaba. Fursadaha waxbarasho waa inay soo jiitaan shakhsiyaadka jooga meesha iyo kuwa ka imanaya aduunka oo dhan.



## Awoodda soo jiidasho ee aqoonaha takhasuska ah

Muuqaal caalami ah, aragti dheer dhinaca qaybaha guud iyo laanta ganacsiga labadaba isla markaana awoodda in la soo jiito shakhsiyaad waa saddex arrimood oo guul muhiim ah u leh horumar. Skellefteå wada shaqaynteeda xoogan iyo shabakadeeda waxay fududeynaysaa in la abuuro goob aragti dheer taas oo tamar siinaysa dadka jeclaanshahooda in wax la ogaado iyo fikir abuurid.

Taas waxaan ku gaaraynaa iyadoo loo sii marayo:

- **Sii horumarinta xarunta jaamicadda Skellefteå**
  Xarunta jaamicadda Skellefteå waa inay xudun u noqoto fikrado cusub, cilmi-baaris la isticmaalo iyo waxbarasho waarta. Tani waxay u dhacaysaa iyadoo loo sii marayo waxbarashooyin horseed ah oo cilmi-baaris caalami ah iyo deegaano fikrado cusub kuna salaysan awoodaha gobol oo wajahaya baahida bulshada iyo shakhsiga, keenayana in dad badan rabaan inay u soo guuraan halkan oo sii joogaan.
- **Soo jiidashada iyo haysashada aqoon**
  Xilliga kobcid waxaa kordha tartanka dhinaca aqoonta. Soo jiidasho aqoon oo firfircoon taas oo wada shaqayn xoogan oo lala yeesho hey'adaha dawladeed ay qayb ka tahay waa in xooga shaqo ee aqoonta leh laga soo jiito qaybaha kale ee Iswiidhan iyo aduunka.
- **Abuuridda fursado loogu talogalay awood soo jiidasho caalami ah iyadoo la soo jiidanayo lana aasaasayo waxbarasho sare dhinaca laamaha kobcaya mustaqbalka**
  Laamaha kobcaya mustaqbalka waxaa faa'iido u ah wada shaqayn dhow oo u dhaxaysa waxbarashada sare iyo shaqo-bixiyayaasha. Tani waxay fududeyneysaa koritaanka iyo horumarka fikradaha cusub.
- **Fikrado cusub dhinaca wada shaqaynta ku kala baahsan qaybaha shaqo**
  Wada shaqaynta u dhaxaysa akadamiga, ganacsiga iyo qaybta guud waa inay ahaato xoog markay noqoto in la horumariyo deegaano fikrado cusub.

Nolosha shaqo iyo kobcidda

# Goob kobcid dhinaca waaridda iyo caalami ah



**Goob kobcid dhinaca waaridda iyo caalami ah**

## Horumarka la doonayo

Skellefteå waa inay ka jirto waasacsanaan dhinaca shaqooyinka aduunka hogaanka u ah dhinaca qaybtooda iyo kuwa doorar muhiim ah leh sida dhinacyada wada shaqaynta lala leeyahay iyo alaab iibiyayaasha. Isku dhex jirkan micnihiisu waa awood tartan oo korodha taas oo ququl joogto ah oo aqoon cusub, fikrado iyo aragtiyo abuurayso horumar keligiis is xoojinaya.

Fursadaha fikrado cusub iyo wada shaqayn qiimo abuuraysa waxaa horey u dhaqaajiya ganacsi abuuraya qiime waaraya, maxali ahaan iyo suuqyada caalamiga ah labadaba. Suuqa shaqada waa inuu ahaado mid leh sinaan, laga mid yahay oo dadka ku casuumaya dooryo xirfad horumar leh dhinaca laamo badan oo balaaran looguna talogalay dadka ku nool iyo dadka ka soo guuray aduunka oo dhan.

Skellefteå waa inay xitaa ahaataa goob si joogto ah u soo jiidata saldhigasho iyo maalgashiyo, taas oo mahadeeda ay iska leedahay qaab wajahaad oo aragti dheer oo waarid u tahay erayga muhiimka ah.

**Wareegidda tan iyo 2015.** Aragtida waxaa laga balaariyay garoonka goboleed loona soo gudbiyay ta caalamiga ah, badanaa ay dhaqaajinayso faa'iidada la xiriirta wax waara. Isla markaas waxaan kor u qaadaynaa sida balaarka laamaha u abuurayso horumarkan.

## Aasaaska

Laga soo bilaabo xaalad ay Skellefteå ku taalay boos banaanka ah ayaan imminkana ku dhacnay bartanka warshadaynta cusub ee Iswiidhan iyo Yurub. Horumarkan wuxuu leeyahay fursado fiican oo wakhti dheer soconaya. Laakiin waxay u baahantahay in hawlaha horyaala sida sinaanta, helitaanka aqoon iyo aasaasyada bulsho ee leh awood tartan loo wajaho qaab sax ah iyo in nidaamka taageero ee horumarka shirkadaha iyo fikradaha cusub ay sii socoto in la horumariyo iyadoo leh aragti caalami ah.

Nidaamka ugu xoogan waa baahida isbaddal waarid leh. Taas ayaa keentay in khayraadkeena goobtan ku xiran ay sidii hore si ka badan u kaalmeyn karaan kobcid iyo horumar.

## Jihooyinkayaga


### Ganacsi noocyo badan iyo suuq shaqo oo laga wada mid yahay

Xiisaha loo hayo Skellefteå waxaa abuuraya shirkado hogaaminaya aduunka dhinaca warshadaha iyo qaybta adeega ee koraysa labadaba. Horumarka ganacsi ee fiican wuxuu dhacay iyadoo loo marayo in isla mar ahaantaas ay shirkado badan ay horey u qaadeen talaabooyin waaweyn.

Balaarsanaanta laamaha iyo shirkadaha waxay abuuraysaa firfircooni iyo awood soo jiidasho isla markaana gobol ganacsi oo si fiican u shaqaynaya, halkaas oo kobciddu ay ka dhacayso xitaa dhinaca abuurka fikrado iyo dhinacyada dhaqan. Tani waxay abuuraysaa saldhig balaaran oo shirkado iyo kala duwanaansho qani ka dhigaysa oo micnaheedu yahay kobcid dheeraad ah. Suuq leh sinaan oo laga mid yahay lehna deegaan shaqo oo fiican iyo wada shaqayn waarta waxay soo jiidanaysaa dad ka yimaadaa aduunka oo dhan.

### Taas waxaan ku gaaraynaa iyadoo loo sii marayo:

- **Jawi balaaran oo saldhigasho oo furan dhinaca dadka iyo hawlaha labadaba**
  Hawsheena saldhigashada waxay ku jiheysantahay hawlaha iyo dadka labadaba ee raba inay u soo talaabaan dhinaca suuqa shaqada. Aragti guud iyo furnaansho ayaa ahaanaya erayga muhiimka ah si loo gaaro wax waara oo laga wada mid yahay
- **Hawl firfircoon dhinaca saldhigashada taas oo xoojinaysa goobtan soo jiidashadeeda**
  Hawsha in la soo jiidato saldhigashooyin waa mid joogto ah oo socota. Waxay si gaar ah ugu jiheysantahay in la socodsiiyo horumar waara kuna salaysan aragti dhaqaale, bulsho iyo deegaan ahaan.
- **Nidaam ganacsi oo noocyo badan wuxuu abuurayaa awood soo jiidasho oo kaalmeynayaa in ganacsiga hadda jira uu sii kobci karo**
  Dhinaca aragti guud oo aan ku soo dhaweyneyno dadka cusub iyo laamo ganacsi oo cusub waxay abuuraysaa firfircooni iyo dardargelin dhinaca suuqyada shaqada iyo laamaha ganacsiga labadaba.
- **Suuq shaqo oo lagu wada jiro**
  Aqoonta jirta oo dhan waa laga faa'iideysanayaa oo dadku waxay helayaan taageero ay ku horumaraan oo ku gaaraan awoodooda oo buuxda.



### Matoorka kobcinta horumar cagaaran

Halkan ayaa dhowr ka mid ah qaybaha ugu qiimo badan cagaaraynta aduunka laga heli doonaa. Laga bilaabo dib u soo saarka alaabta, wax soo saar iyo dib u isticmaal alaab. Skellefteå waa inay ahaato matoorka kobcinta cagaaran iyo mid ka mid ah awoodaha ugu xoog badan ee dhinaca kobcin waarta gudaha Yurub, iyadoo ay sal u tahay tamar dib loo cusboonaysiiyo iyo nidaam tamar waaraysa.

In la isu baddalo dhaqaale wareeg ku socda waxay awood weyn u leedahay in la yareeyo isticmaalka khayraadka oo sidaas lagu xadeeyo raad ku yeelashada cimilada iyo deegaanka. Qaybaha ganacsiga iyo kuwa guud labadabu waxay doorar muhiim ah u leeyihiin dib u habayntan oo tani waxay u baahantahay fursadaha oo kordha dhinaca maalgashiyo wax waaraya, nashqado ganacsi oo cusub iyo xalyo farsamo.

## Taas waxaan ku gaaraynaa iyadoo loo sii marayo:

- **Ka faa'ideysiga farsamo cusub iyo in loo dhaqmo sidii goob tijaabo**
  Tijaabooyinkeena iyo deegaanadeena fikradaha cusub waa inay ka jiraan goob u dhaxaysa horumar, waxbarasho, cilmi-baaris iyo fikrado cusub. Tani waxay horumarinaysaa fikrado cusub, tijaabo iyo hirgelinta farsamo cusub iyo nashqado ganacsi oo cusub oo horumarinaya dib u habayn waarta oo ganacsi iyo bulsho.
- **Horumarinta hogaan aqoon dhinaca wixii waaraya**
  Faafinta aqoon iyo hawlo kale oo kaalmeynaya horumarka nidaamyo waara, dhijitaal ah, wareegaya iyo ganacsiyo iyo hawlo wax ku ool leh. Waa inay ku jiheysnaadaan laamaha ganacsiga iyo kuwa guud labadaba.
- **Awoodda soo jiidashada ganacsatada**
  Waxaanu soo jiidanaynaa dadka iyo ururada raba inay kaga rumeeyaan fikradahooda horumarinta bulshada mustaqbalka ee wixii waaraya.
- **Silsilad xoogan dhinaca la xiriirta gacansiga**
  Hawlo cilmi-baaris ayaa la fulinayaa oo leh fikrad cad kuna saabsan in la gaaro suuqa ganacsiga. Si taas loo helo waa in dadaalada si wadajir ah loola fuliyo shuraakada ganacsiga iyo iyadoo wada shaqayn lala yeesho jaamicadaha qaran iyo kuwa caalamiga ah labadaba.
- **Horumarinta sawirka laga haysto gobolkan**
  Dhinaca sawir la cusboonaysiiyay oo horey u socod ah in laga haysto waqooyiga Iswiidhan waxay kordhinaysaa awoodeena soo jiidasho ee caalamiga ah oo fursado u abuuraysaa ganacsiga gobolka inuu horumaro oo kobco .

### Wada shaqayntu waxay xoojinaysaa oo abuuraysaa xiriiryo cusub


Skellefteå waa inay xarun u noqoto gobol ay astaan u tahay horumarin ganacsi waara iyo kobcid. Aduunku waa inuu si joogto ah u dhowaado – iyadoo loo marayo in xiriiryo maalinle ah lala yeesho hawlo dhaqo oo badan iyo dabcan shuraakada wada shaqaynta si loo sii wado horumarka. Mahadaa iyadoo leh shabakad si fiican u horumarsan iyo aqoon urursan waxaa ganacsiga horey u jiray u fududaanaysa in la helo aqoon sax ah si looga dhabeeyo talaabada ku xigta ee horumarkooda.

Taas waxaan ku gaaraynaa iyadoo loo sii marayo:

- **Shirkado takhasus ah oo heer caalami ah**
  Qaabaynta waa in la sameeyo iyadoo leh hadafyo sare iyo rajooyin. Himiladu waa inay ahaato in la dhiso hogaan.
- **Wada shaqayn leh fikir cusub heer maxali iyo heer caalami ah**
  Dhinaca laamaha ganacsiga ee bilaa xadka ah iyo wada shaqayn caqli fiican ayaa lagu horumarinayaa fikir cusub iyo awood tartan oo caalami ah.
- **Taageero horumarinaysa ganacsiga iyo fikradaha cusub**
  Taageeridda fikradaha cusub oo xooga saaraysa fikradaha cusub ee bulsho iyo ganacsi iyo caalami ka dhigidda fikradaha cusub waa in la xoojiyo.

Safaro, gaadiidyo iyo ku xirnaansho

# U dhowaansho nolosha maalinlaha iyo caalamka



**U dhowaansho nolosha maalinlaha iyo caalamka**

## Horumarka la doonayo

Aasaasyo bulsho oo laga mid yahay oo la heli karo waxaa lagu wajahayaa baahida dhaqdhaqaaq, tirada safarada oo korodha iyo gaadiidka. Iyadoo loo marayo farsamo takhasus oo lagu kalsoonyahay iyo doorasho jidka wax waaraya ayaanu si wadajir ah uga dhignay inay fududahay oo amaan tahay in la safro, iyadoo aan ku xirnayn meesha degmada ah ee guriga ama meesha loo safrayaa ku taalo ama qofka raba inuu safro. Iyadoo loo marayo in noocyada gaadiid oo dhan wada shaqeeyaan oo si fiican loo qorsheeyay ayaa gobolka lagu xirayaa inta kale ee aduunka ah lana abuurayaa goob leh awood tartan dhinaca gaadiidyada shakhsiga iyo badeecadaha. Isla markaas waxaa la sahlayaa nolosha maalinlaha ah iyadoo loo marayo fikir cusub oo dhijitaal ah iyo xalyo adeeg oo masaafooyinka dhaafsan.

## Aasaaska

In dib loo habeeyo safaro iyo gaadiidyo waaraya waxay leedahay baaxad dhaqaale, bulsho iyo cilmi noole iyo deegaan. Bulsho ahaa waxaa jirta baahi ah in la qaabeeyo xalyo kaalmeynaya sinaanta – oo horumarinaya caafimaadka dadweynaha.

Waxay xitaa fure u tahay in la suurtageliyo kobcin dhinaca xaalad ay ganacsiga iyo dadweynaha labaduba kordhayaan. Aasaasyada bulsho iyo farsamo masaafo ahaan baahsan waxaa loo baahanyahay in la horumariyo si la jaan-qaadaysa dhammaan bulshada qaybaheeda, si loo taageero soo jiidashada kordhaysa, ka mid ahaanshaha iyo hawsha nolosha taas oo qaybahaas oo dhan la is waafajinayo.

Isla markaas nidaamyada in la horumariyo oo la dhiso aasaasyo bulsho oo aragti dheer oo ay ku jiraan nidaamyo badan. Skellefteå waxay u baahantahay qaab urursan oo ah in laga faa'iideysto horumarkan. Haba ugu yaraatee in la wajaho ganacsiga baahidiisa in ay korodho tirada gaadiidka badeecadaha, taas oo gaadiidka badda iyo jidadka tareenada ay door aad muhiim ah ka ciyaarayaan.

**Wareegidda tan iyo 2015.** Waxaanu kor u qaadaynaa dhaqdhaqaaqa, kordhinaynaa xoog saaridda gaadiidka badeecadaha iyo wada shaqaynta u dhaxaysa qaabab gaadiid oo dhowr ah. Jiheyntan waxay ku saabsantahay in la horumariyo nidaamka gaadiid si loo wajaho korodhka kobcid, baahida dib u habayn waaraysa. Erayga wax waaraya waxaa lagu balaarinayaa dhammaan saddex aragtiyood, taas oo waaridda bulsho ee gaarka ee xooga la saarayo caafimaadka dadweynaha ay kordhayso micnaheedu.

# Jihooyinkayaga

## Safaro maalinle ah oo fudud oo la helo

Waa inay fududeyd iyo hubaal ahaato in la safro gudaha Skellefteå. Iyadoo aanay ku xirnayn haddii ay ka dhacayso miyiga, dhexda meelaha dhismaha badan ama gudaha magaalada. Marka xalyo cusub dhinaca gaadiidka dadweynaha sida jidad dadka iyo baaskiilada ah si sax ah loo qaabeeyay ayay si dheeraad ah u fududaanaysaa dadka oo dhan inay qaadaan mas'uuliyadda ka saaran cimilada, deegaanka iyo caafimaadka. Xalyada taraafikada waxay ku salaysanyihiin aragtida safarka oo dhan oo waxaa loo horumarinayaa inay dadka oo dhan ka mid ahaadaan iyo in la wajaho qaababka safar ee kala duwan iyo baahida.

Taas waxaan ku gaaraynaa iyadoo loo sii marayo:

- **Gaadiid dadweyne oo raad ku yeelasho hooseysa ku leh cimilada**
  Safarada guud waa inay kordhaan. Gaadiidka dadweynaha wuxuu muhiim u yahay in la sahlo safarka maalinlaha ah iyo in la abuuro fursado isku mid ah in lagu noolaado, laga shaqeeyo oo wax laga barto degmadan oo dhan.
- **Jidadka dadka iyo baaskiiladu maraan oo kordha**
  Jidadka dadka iyo baaskiiladu maraan, aasaas ahaan waa mid waaraya, laakiin halkan waxaa ku jiraa xitaa faa'iidooyin dhinaca sinaanta iyo ka mid ahaanshaha kuwaas oo muhiim u ah in Skellefteå ku sii socoto horumar.
- **Safaro baabuur oo fudud oo hubaal ah oo yaraynaya raad ku yeelashada deegaanka**
  Shabakadda jidadka ee Skellefteå waa inay si fiican ugu habaysnaato dadweynaha kordhaya iyo degmado kobcaysa. Markaas ayaa safar kasta oo baabuur la raaco loo samaynayaa qaab hubaal ah oo waaraya.



### Aasaasyo bulsho oo dhijitaal ah oo fududeeya nolsha maalinlaha ah

Iyadoo loo marayo in laga faa'iideysto xalyo farsamo ayaa adeegga bulsho iyo goobaha kulanka ay heli karaan dad sii badan. Isla markaasna aasaasyada bulsho ee dhijitaalka ah waxay kaalmeynayaan in dadka iyo hawlaha shaqooyinka labadabu ay si fudud u gaadhaan suuqyadooda, macaamiisha iyo shakhsiyaadka.

Taas waxaan ku gaaraynaa iyadoo loo sii marayo:

- **Xalyo farsamo oo cusub oo la horumariyay**
  Hawlaha shaqooyinka guud waxay ku dhiiradaan inay horey u socdaan marka ay ku saabsantahay farsamo cusub iyo horumar lagu socodsiiyo kombiyuutaro looguna talogalay xalyo farsamo cusub oo ah hubaal oo fiican in la isticmaalo. Qaabkaas ayaan ku noqon karnaa kuwo dhakhso ah, fikir cusub leh iyo khayraad waara oo wax ku ool leh.
- **Dadka degan iyo shirkado ku xiriirsan**
  Aasaasyada bulsho ee dhijitaalka ah waa qaar dadku ka mid yahay oo ku baahsan dadyowga iyo shirkadaha gudaha Skellefteå oo dhan. Tani waxay hubaal ka dhigaysaa oo horumarinaysaa aawooda tartanka iyo soo jiidashada.
- **Qaab wajahaad laga mid yahay**
  Wada shaqaynta u dhaxaysa bulshada rayidka, qaybta guud ee dadweynaha iyo ta gaarka loo leeyahay waa inay ka gudbaan farqiyada aqoonta ee u dhaxaysa oo suurtageliyaan isticmaalka adeegyo dhijitaal ah iyo adeeg loogu talogalay dadka oo dhan.



### Noocyo gaadiid oo horumarsan oo la isku dubbariday

Isgoysyo la horumariyay iyo qulqulka gaadiidka jidka tareenada, gaadiidka badda, gaadiidka wadooyinka iyo diyaarado ayaa Skellefteå si dhow ugu xiriirinaya aduunka intiisa kale. Dhexda degmadan waxaa badeecadaha lagu qaadayaa gaadiid shaqaynaya iyo wadooyin isku xiriirsan oo way fududahay in la kala baddasho noocyada gaadiid ee kala duwan.

## Taas waxaan ku gaaraynaa iyadoo loo sii marayo:

- **Qorsheyn horumarsan iyo isku dubarridka safaro iyo gaadiidyo ah wax waaraya**
  Dhinaca aragti guud iyo fikirka wixii waaraya ayaa lagu abuurayaa aasaasyo bulsho iyo xalyo nidaam oo loogu talogalay awoodda tartan iyo safaro iyo gaadiidyo ah wax waaraya.
- **Gaadiidyo jidka tareenka ah oo wax ku ool u ah gobol koraya**
  Gaadiidyo jidka tareenka ah waxay lagama maarmaan u yihiin in la suurtageliyo gobol weyn, socodka maalinlaha ah iyo in la hubiyo ganacsiga baahidiisa gaadiidyo badeecado oo ah wax waaraya.
- **Gaadiidyo badda ah oo wax ku ool ah una fiican deegaanka**
  Skellefteå waa inay sii horumarto si loo wajaho horumarka farsadmo ee dhinaca gaadiidka badda iyo baahida kordhaysa ee gaadiidka badeecadaha caalamiga ah.
- **Xudun firfircoon dhinaca gaadiid diyaarado waaraya**
  Skellefteå waa inay hogaan u ahaato fikradaha dhinaca gaadiid diyaardo waaraya oo u dhaqanto sidii goobta tijaabo ee duulimaadyada mustaqbalka.

# Fulinta iyo la socodka

Skellefteå oo dhan waxay kaalmeynaysaa fulinta xeeladdan. Qaabkayaga wajahaadda – wax wada abuurid, awood wax ka baddal iyo wada shaqayn – ayaa ah aasaaska dhinaca fulinta, iyadoo aan ku xirneyn qaybaha ka hawl galaya. Dhinaca urur ahaanee degmo waxay tahay xeeladdan qayb si qoto dheer uga mid ah shaqadan maamulkeeda iyo hogaankeeda.

Degmada hadafyadeeda guud waxay ku salaysanyihiin xeeladdan, oo hawlaha balaaran ee horyaala Skellefteå horumarkeeda ee golaha degmadu u aragto inay ugu muhiimsanyihiin in la hogaamiyo inta lagu jiro wakhtiga ay imminka ku fadhiyaan kuraasta. Iyadoo sidaas ku salaysan ayaa golaha degmada go'aamiyaan hawsha iyo jihooyinka loogu taloglaay degmada guddiyadeeda iyo shirkadaheeda.

La socodka xeeladdan wuxuu dhacaa iyadoo loo marayo baarista goobtan horumarkeeda oo ku salaysan afarta aag ee xeeladdan. Degmada Skellefteå waxay ballanqaadaysaa in sanad walba la cabbiro oo la sheego bulshada horumarkeeda iyo waxa la qabanayo si loo fuliyo xeeladdan.

## Cusboonaysiinta

Degmada Skellefteå ayaa qaadaysa mas'uuliyadda in la hogaamiyo ka warhaynta iyo wixii cusboonaysiin ah ee xeeladdan sanadkii hal mar calaa wakhti xileed. Iyadoo taas la xiriirta ayaa la samaynayaa la socod qoto dheer dhinaca horumarka dhanka aag xeeladeed walba. Hawshan waxaa hogaaminaysa himilada ah in la dardargeliyo oo la dhiirigeliyo nidaam ay astaan u tahay furnaan iyo wadahadal. Golaha degmada ayaa go'aaminaya nooca dib u cusboonaysiisyada la samaynayo.